# SHEEKO DHIIRI GALIN LEH




WAAGA OO U BARYAYA XERO BARAKACYAAL OO KU TAALLA SOOMAALIYA.
XUBNAHA BULSHADA OO BILLAABAYA NOLOL MAALMEEDKOODA.
QAAR WAXAY U SOCDAAN MASAAAJIDKA U DHOW GURYAHOODA.
HAWEENKA IYO CARRUURTU WAXAY ISKU DIYAARINAYAAN INAY KU TUKADAAN GURYAHOODA.


HAWL-MAAMEELKOODII AYAA U BILLAABATEY XERADA BARAKACYAASHA.


HAWEENKA IYO CARRUURTA OO BIYO SOO DHAAMINAYA.


CARRUURTU WAY CIYAARAYAAN.


URUR AAN DOWLI AHAYN OO U DIYAAR GAROOBAYA INAY LA KULMAAN GUDIGA MAAMULA XERADA BARAKACAYAASHA.
URUR AAN DOWLIGA AHAYN OO XERADA IMANAYA SI AY U DHIIRIGELIYAAN WACYIGELINTA KA DHANKA AH TACADIYADA KU SALEYSAN GALMADA IYO JINSIGA.
XAFIISKA GUDDIGA MAAMULKA XERADA.


SUBAX WANAAGSAN.
SUBAX WANAAGSAN, SOO DHOWAADA.


WAXAAN RABNAA INAAN IDINKA TAAGEERNO DADAALADA LOOGU JIRO WACYIGELINTA IYO WAX KA QABASHADA TACADIYADA KU SALEYSAN GALMADA IYO JINSIGA.
BULSHADU WAY U BAAHAN TAHAY XOGTA KU SAABSAN ARINTAN, MAHADSANIDIIN.


WAAN IDINLA SHAQAYN DOONAA, WAANA ABAABULI DOONAA BULSHADA.
MAHADSANIDIIN, AAN RAGA IYO DUMARKA SI GOONI GOONI AH UGULA KULANNO GAROONKA KUBADDA CAGTA.


BAABUURKA OO TEGAYA GAROONKA KUBADDA CAGTA.


ASSALAMU CALEYKUM.
WA CALEYKUM WASALAAM.
ASSALAMU CALEYKUM.
WA CALEYKUM WASALAAM.


MAANTA, WAXAAN U SOCONAA INAAN KA HADALNO TACADIYADA LA XARIIRA GALMADA IYO JINSIGA. WAXAAN RABAA INAAN OGAADO KHIBRADIINA IYO FIKRADIINA KU SAABSAN ARINTAN.
MAANTA, WAXAAN HALKAN U JOOGNAA INAAN WAX KA OGAANO ARIMAHA LA XARIIRA TACADIYADA GALMADA IYO JINSIGA.
WAXAN RABAA INAAN IDIIN SHEEGO DHACDADA LABA DUMAR AH OO LAGU KUFSADAY XERADA BARAKACYAASHA EE DARISKA AH.
XERO BARAKACYAAL.
RAG DHARKA CIIDANKA XIRAN AYAA INTA BADAN GUDAHA U SOO GALA XERADA BARAKACYAASHA.
LABA HAWEEN BARAKACAYAAL AH AYAA XAABO GURANAYA. RAG DHARKA CIIDANKA XIRAN AYAA DHANKOODA KU SOO SOCOTA.


WAAN NASIIB BADANAHAY, CIDNA MEELAHAN MA JOOGTO.
DUMARKAN HORE AYAAN U ARKEY. ALLA MAXAAN FURSAD HEYSANAA! WAA KALIGOOD MAANTA.
MAXAAD RABTAAN?
NA DAAYA!
!!
LABADIINABA, HALKAN KAALAYA HADDA! JUUQ HA DHIHINA!
SEDEXDII NIN AYAA WEERARAY OO KUFSADAY LABADII HAWEEN EE BARAKACYAASHA AHAA, HALKII BAYNA KAGA TAGEEN.
MA NOO SHEEGI KARTAA WAXA DHACAY INTAAS KADIB?
HA WELWELIN. HADDA WAXAYNU TAGEYNAA SI AAN U ARAGNO KALKAALISO, BERRINA WAXAAN BOOLISKA KU WARGELIN DOONAA DHACDADA.
KA WARRAN HADDII BULSHADU MAQLAAN WIXII NAGU DHACEY?


DADKII ISKU SOO URURAY AYAA LA YAABAY GEESINIMADA ISLAANTA DA'DA AH.
KU SOO DHOWAWAADA SALDHIGGA BOOLIISKA, SIDEEN IDIN CAAWIYAA?
WILKAYGIIYOW! LABADAN DUMARA AYAA SHALAY SADEX NIN OO DIREYS XIRAN KU KUFSADEEN MEEL U DHOW XERADEENA BARAKACYAASHA. WAXAAN U BAAHANAHAY CADAALAD.
FADLAN II SHEEGA MAGACYADIINA IYO WAXA IDIN KU DHACAY.
MAGACAYGU WAA XAAWO SAXIIBTEYNA WAA XALIIMO. HAA, WAA RUN.
FADLAN NAGU CAAWI INAAN CADAALAD HELNO.
MA AQOONSAN KARTAAN SADDEXDA NIN EE HUBEYSAN?
HAA SARKAAL.
MAXAA?! MA ASKARTAYDA?! WAA KUU IMANAYAA.
WAAD KU MAHADSANTAHAY IMAATINKA XAFIISKAYGA, TALIYE. WAXAAN HAYNAA EEDEYMO KUFSI AH OO LOO HAYSTO ASKARTAADA.
KA DIB MARKII AY LABADA HAWEEN SOO GUDBIYEEN DACWAD KA DHAN AH ASKARTA, BOOLISKU WAXAY QAADEEN TALLAABO DEG DEH AH.
SADEXDII TUHUNSANE AYAA LA SOO XIREY IYADOO GACAN LAGA HELAYO TALIYAHA.
SADEXDII NIN AYAA LAGU HELAY INAY GALEEN DEMBIGA, WAXAANA LAGU XUKUMAY XABSI.


DADKII ISKU SOO BAXAY AYAA HAWEENEYDA WAAYEELKA AH UGU SACAB TUMAY GEESINIMADEEDA INTII AY MARAGFURAYSAY.
HAWEENEY BOOLIS AH AYAA HADDA KULANKA KU SOO BIIRTEY, WAXAYNA LA FADHISAA QABANQAABIYEYAASHA.
ANIGOO AH SARKAAL BOOLIIS DUMAR AH, WAXAAN RABAA INAAN IDINKU DHIIRIGELIYO INAAD CABASHADIINA BOOLIISKA U GUDBISAAN.
WAXBA KAMA AANNU OGEYN SHAQADA BOOLISKA, WAXAAN ARAGNAY KIISAS DAMBIILAYASHII LA SII DAAYAY.
HADDA WAXAAD SALDHIGGA BOOLIISKA KU HAYSATAAN, SARAAKIIL BOOLIIS DUMAR AH, WAADNA NOO IMAN KARTAAN IYADA OO AANAY JIRIN WAX CABSI AH.

# WAXA AY TAHEY IN LA SAMEEYO IYO WAXA REEBAN IN LA SAMEEYO






TACADIYADA KU SALEYSAN GALMADA IYO JINSIGA WAA DENBI, WAANA XADGUDUB XUN OO KA DHAN AH SHARAFTA BANI'AADANKA WAXUUNA KHATAR KU YAHAY NABADAYNTA.

QARAMADA MIDOOWBEY WAXAY DOWALADA FEDERAALKA SOMAAALIYA IYO DOWLAD GOBALEEDYADA XUBNAHA KA AH FEDERAALKA KU TAAGEERTAA HIRGELINTA QORSHE HAWLEEDKA QARAN EE SOOMAALIYA EE HIRGELINTA AXDIGA HAWEENKA SOOMAALIYEED IYO QARAARKA QARAMADA MIDOOBEY EE TIRSIGIISU YAHAY 1325 EE HAWEENKA, NABADA IYO AMNIGA (2021-2025).

ILAALIINTA HAWEENKA IYO GABDHAHA, RAGA IYO WIILASHA WAA UDUB DHEXAADKA DADALLADA QARAMADA MIDOOBEY EE SOOMALIYA.



UNSOM

/UNSOMALIA

/UNSOMALIA

UNSOM.UNMISSIONS.ORG